**Nuxurka Kulanka Guddiga Maamulka Maaliyadda (FGC)**
**Kulanka 72aad – 12ka Janaayo 2026, Muqdisho, Soomaaliya**

## Guudmar

Guddiga Maamulka Maaliyadda (FGC) ayaa magaalada Muqdisho ku yeeshay kulankoodii 72aad, taariikhdu markii ay ahayd 12ka Janaayo 2026. Kulanka ayaa lagu falanqeeyay horumarrada laga sameeyay dhinaca koboca dhaqaalaha iyo hufnaanta maaliyadda, marxaladaha ay marayaan dib-u-habeynta maamulka maaliyadeed, geeddi-socodka dib-u-eegista dastuurka, maamulka kheyraadka dabiiciga ah, Tusmada Aragtida Musuqmaasuqa (CPI), kobcinta dakhliga, iyo warbixinno ku saabsan qandaraasyada dawladda. Doodaha ayaa diiradda lagu saaray horumarka dib-u-habeynta, khataraha maaliyadeed ee soo ifbaxaya, iyo mudnaanta tallaabooyinka xiga.

## Horumarrada Dhaqaalaha iyo Hufnaanta Maaliyadda

Wasiirka Maaliyadda ahna guddoomiyaha guddida ayaa wuxuu xubnaha la wadaagay xogta horumarradii ugu dambeeyay ee dalka, isaga oo xusay in dib-u-habeyntu ay sii socoto inkasta oo ay jiraan hubanti-la'aan dhanka deeqihii caalamka ah iyo xiisado juqraafi-siyaasadeed. Wuxuu tibaaxey ansixintii Baarlamaanka ee Miisaaniyadda 2026, dhammaystirka hannaankii Dib-u-Eegista Afraad ee IMF ee hoos timaadda Barnaamijka Kaalmada Dhaqaale ee loo yaqaanno ECF, iyo kulankii ugu horreeyay ee Golaha Maamulka Bangiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska Soomaaliya, kuwaas oo dhammaantood muujinaya hannaanka dib-u-habeynta iyo maalgelinta Soomaaliya. Soo gudbinta Miisaaniyadda 2026 ayaa waxa ay waafaqsanayd shuruudaha maareynta deymaha ee Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud (PFM Act), iyadoo Baarlamaankuna dib u eegay kana ansixiyay amaahdii ugu horreysay ee cusub tan iyo markii la gaaray cafinta deymaha.

Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee Soomaaliya (CBS) oo ah xubin ka tirsan guddida ayaa sidoo kale sheegay in nidaamka bangiyada uu yahay mid xasilloon, isla markaana Bangiga Dhexe uu sii ballaarinayo awooddiisa kormeer. Kadib ansixinta Sharciga Hay'adaha Maaliyadeed ee la cusboonaysiiyay iyo Sharciga Caymiska bishii May 2025, BDS waxuu siisay shatiyo 10 hay'adood oo micro-finance ah, sidoo kalena wuxuu bilaabay hannaanka shatiga shirkadaha caymiska. Guddoomiyuhu wuxuu carrabka ku adkeeyay qorshayaasha lagu xoojinayo nidaamyada IT-ga, amniga xogta, iyo tixraaca deynta, si loo kordhiyo amaahda bangiyadu siiyaan ganacsiga gaarka loo leeyahay.

## Tusmada Aragtida Musuqmaasuqa (CPI)

Guddigu wuxuu ka dooday soo jeedimo ku saabsan istaraatijiyad lagu hagaajinayo kaalinta Soomaaliya ee Tusmada Aragtida Musuqmaasuqa. Tallaabooyinka la soo jeediyay waxaa ka mid ahaa ballaarinta xogaha ilaha lagu cabbiro CPI-ga ee Soomaaliya, laba-jibbaaridda dadaallada

hirgelinta dib-u-habeynta, iyo xoojinta awoodda qaran ee cabbirka musuqmaasuqa. Waxaa la isla qaatay in loo baahan yahay shaqo dheeraad ah, oo ay ku jirto ballaarinta wada-xaajoodyada gudaha Dowladda iyo ka barashada waayo-aragnimada dalalka helay dhibco sare ama si degdeg ah u hagaagay.

**Maamulka Kheyraadka Dabiiciga ah**

Guddigu wuxuu dib u eegay horumarrada laga sameeyay waaxda batroolka. Xubnuhu waxay xuseen horumar laga sameeyay maaraynta heshiisyada wadaagga wax-soo-saarka (PSAs) ee jira, waxaana lagu wargeliyay qorshayaasha Turkiga ee qodista ceel tijaabo ah qeybta hore ee 2026, ka dib natiijooyin seysmik oo wanaagsan. Waxaa sidoo kale laga hadlay diyaar-garowga bilaabista wareeggii ugu horreeyay ee tartanka shatiyeynta ee Soomaaliya iyo sii wadidda la-shaqeynta saaxiibada dhanka farsamada. Warbixinno ayaa sidoo kale laga bixiyay waaxda kalluumeysiga, oo ay ku jiraan wadaagga dakhliga lala yeesho Dowlad-Goboleedyada iyo aasaaska Shirkadda Kalluumeysiga Qaranka, taas oo gashay iskaashi ganacsi (joint venture) ay la yeelatay shirkadda Turkiga ee Oyak si loo maareeyo kalluumeysiga.

**Kobcinta Dakhliga Gudaha**

Xubnuhu waxay dib u eegis ku sameeyeen horumarka laga gaaray kobcinta dakhliga gudaha iyo dib-u-habeynada socda, oo ay ku jiraan horumarinta nidaamyada iyo isku-duwidda hay’adaha. Warbixinno ayaa laga bixiyay tallaabooyinka lagu nidaaminayo jarista khidmadaha dekedda Muqdisho ee ku jira qaab-dhismeedka miisaaniyadda federaalka. Guddigu wuxuu sidoo kale ka dooday wax-soo-saarka dakhliga ee 2025. Horumarrada laga sameeyay canshuurta iibka, canshuurta dakhliga iyo dakhliga aan canshuurta ahayn, oo ka dhashay dib-u-habeynta socda, ayaa qayb ahaan ka dhigay mid la yareeyo saameynta maaliyadeed ee hoos-u-dhaca gargaarka ee ku yimid dakhliga kastamka.

**Qandaraasyo iyo Heshiisyo**

Guddigu wuxuu dib u eegay arrimo muhiim ah oo la xiriira qandaraasyo iyo wax-iibsiyo, oo ay ku jiraan qorshayaasha socda ee horumarinta Dekedda Cusub ee Muqdisho. Xubnuhu waxay adkeeyeen muhiimadda ay leedahay qiimeynta ikhtiyaarrada kala duwan ee maalgelinta marka loo eego faa’iidada degdegga ah iyo tan fog ee Soomaaliya, iyada oo la hubinayo habraac sax ah, daahfurnaan, iyo waafaqsanaanta shuruucda iyo hay’adaha. Waxaa sidoo kale la xusay horumarka ka socda dalabyada iyo qiimeynta qaar, iyo baahida loo qabo in la sii wado ka-qaybgalka Guddiga Tanaasullada Wasaaradaha (IMCC).

**Gunaanad**

Guddoomiyaha Guddida ayaa wuxuu uga mahadceliyay xubnaha guddida talooyinkooda wax-ku-oolka ah, wuxuuna mar kale adkeeyay ballanqaadka Guddiga ee xoojinta hufnaanta maaliyadeed, daahfurnaanta, iyo isku-xirnaanta hay'adaha. Tallaabooyin daba-gal ah ayaa lagu heshiiyay iyadoo lala akhriyayo ajandayaasha kala duwan ee shirka lagaga wada hadlay, kuwaas oo maxsuulkooda dib loogu eegi doono kulanka xiga ee FGC.